
# CIYAARAHA SOOMAALIDA *

( The Somali games )

*Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'*
Hal_aqoon@yahoo.com




Ciyaar Soomaali kolka la soo hadal qaado, qof kasta oo Soomaaliyeed waxa maankiisa kolkiiba ku soo dhaca ciyaaraha tilmaama hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed sida *walasaqada, herimaaheeda, beerreyda, botorka, ceerigaabaawida, wilwilada, dhaantada, hirwada, Kabeebey-da,* iwm. Ciyaarahaasi waa kuwa jiibta iyo jaanta la jaanqaada. Waxa haddaba jira ciyaaro kale oo farabadan oo ay ka mid yihiin kuwa maanka iyo maskaxdu ka qaybqaataan, kuwa xoogga iyo firfircoonidu ku dheehan yihiin iyo kuwa dhallaanka yaryar u gaar ka ah ee ay ku madaddaashaan. Waxa jira qaar kale oo fadhiga lagu ciyaaro. Qoraalkan, waxaan haddaba, si gaar ah ugu eegi qaar ka mid ah ciyaarahaasi aan soo tilmaannay. Waxaad qoraalkan ku ogaan sida aynu u leennahay ci-yaaro farabadan oo ka mid ah kuwa adduun weynaha laga ciyaaro ama kuwa Olombiga lagu tartamo.

**Ciyaaraha xoogga iyo firfircoonidu ka muuqato oo ay inta badan ciyaaraan kureyda iyo dhallintu waxa ka mid ah kuwan hoos ku qoran:**

**Beretan** (Foot-racing): In kasta oo aanay Soomaalidu, sida reer galbeedka, baaxad beegan ku tartami jirin haddana wey beretemi jireen oo qofba qofka uu ka dheereeyo waa la ogaan jirey. Inta aan ka warqabo laba ayaa orodka loo qaybshaa. Waa ka loo yaqaan *jaantaa rogan ama laysuma joogaan oo* runtii meel laga wada ordo hayeeshee aan laysa sugin. Meesha loo ordayaana meesha laga ordayo aad bey uga durugsantahay. Sida loo kala hor xiiqi ogyahay ayaana loo kala hadhaa. Ka labaad waa ka loo *yaqaan fagaxda.* Orodkan labada meelood ee loo kala ordayaa aad bey isugu dhowyihii, qof walibana itaalkiisa waxba lama hadho.

**Bootaalaysiga**: Labada booddo ee ay reer galbeedku boodaanba Soomaalidu wey booddaa. Waa booddada sare oo ay geed ka dul boodaan iyo booddada hoose oo ay meel tilmaaman ka boodaan, qof kastana la ogaado inta uu boodi karo.

**Caddalool**: Ciyaartan waxa la ciyaaraa habeennada caddada oo qudha. Gole ama xero ayaa la xeertaa inta laba kooxood laysu qaybsho. Qori yar oo astaan lagu garto leh ayaa la soo qaataa. Qof kasta oo ciyaarta ku jiraana waa inuu eego oo loo sheego astaanta uu leeyahay ee uu kaga duwan yahay qoryaha kale ee dhulka iska buuxa. Inta golaha laysugu wada yimaaddo oo indhaha laysku wada qabto ayaa mid ka mid ah dhallintu qorigii u tuurayaa dhinaca uu doono. Kolka sanqadhiisa la maqlo ayaa lagu dhaqaaqayaa baadigoobkiisa. Qofka soo helaa wuu is qarinayaa. Isaga oo sita oon la seemin ( la taaban ) waa inuu golihii ku soo noqdaa. Haddii la ogaado inuu qorigii helay qoladii uu ka tirsanaa mooyee tii kale waxay ku dadaalaysaa inaanu golaha soo gelin kiiyoon la taaban. Haddii la taabto qofka qoriga helay wax guul ah oo ay qoladiisu tirsanayaa majirto.

**Dabartan**: Ereyga *Dabar* waa xadhigga awrta labada jeeni laga xidho. Dabartankuna waa ciyaar ay dhallintu ciyaarto oo inta dabarro la soo qaato laysla dhaco. Dhallinta da'doodu tahay ilaa 22 jir ayaa ka qayb qaadata. Laba kooxood baana laysu qaybshaa. Qoladii laga xoog roonaado oo lagu eryadu ayaa laga reeyaa.

---

- Waxan soo ururiyey in ka badan afartan ciyaarood. Qaar baa dhawr magac leh oo looga kala yaqaan dhulalka Soomaalidu degto. Inta halkan aan ku soo bandhigay waa intii aan garanayey ama baadhiddoodu ii fududaatay. Sidaas awgeed, haddii ciyaartaad tiqiin ama aad jeclayd yaraantaadii aanay ku jirin kuwa la soo bandhigay noo soo qor, oo noo soo sheeg sida loo ciyaaro, si aan doorka dambe ugu soo darro kuwa dambe ee aannu soo bandhigidoonno.
- Qoraalkani wuxu mar hore ku soobaxay warsidaha *Hal-aqoon Xidhmadiisii 3aad.*

**Dacartan**: Ereygu wuxuu ka soo jeedaa ereyga dacar oo ah geed magacii. Dacaree waa fal oo waa dacar la dhac. Dacartan waa ciyaar ay dhallinyaradu ciyaarto oo inta ay kooxo isu qaybiyaan, ay isla dhacaan dhegaha geedka dacarta (marka la deggen yahay deegaan aan dacartu ka bixin, waxa laysla dhacaa saalo geel ). Ciddii laga gacan fududaado oo la eryado ayaa laga badshaa. Ilaa inta ay iska dhiiba-yaanna lagama daayo dhicidda dacarta.

**Dhugtan**: Waa ciyaar dhallintu ciyaarto oo ay ku kala ogaadan ka ugu dhugta wacan. Waxa kale oo la yidhaa *nishaabtan.Waagii* hore inta wax meel la dhigo, sida dheg weyn oo dacar ah, haan, hadhuub gaal gaboobey, ama kab madhatay iwm., oo in laysla ogyahay loo jirsado ayaa murjinno lagu aa'i jirey. Hadda waxa la adeegsadaa qoryo iyo xabbado. Carruurtu waxay ku dhugtantaa oo ku dhug bartaan mulacyada. Inta ay leeb iyo qaanso qaataan bay duurka galaan oo mulac layn u dhaqaaqaan. Midba inta mulac ama qul ee uu dilo ayaa laysu tirsadaa. Taasina weeye ta ay maahmaahda Soomaaliyeed ee tidhaa: *Carruurna waa u ciyaar, mulacna waa u qoorgooyo,* ku dhisaalan tahay.

**Dhagadhagaysi** (Hackysack): Waa ciyaar iyana ay dhallinta reer magaalku inta badan isku madaddaaliso oo lagu ciyaaro liin dhanaan la dhilay ama maro yar oo la duud duubay ama kiish yar oo wax lagu shubay. Lugta ayaa kor loogu tuurtuuraa. Waxa loo kala badiyaa sida loo kala tiro bato. Tirada la qabsaday haddii ay boqol tahay waa in qofka bilaabayaa uu dhammaystiro isaga oo aanay marna basha lagu ciyaarayaa dhulka uga dhicin. Haddii ay dhulka uga dhacdo isaga oon gaadhin tirada foraddu ku dhalanayso waxay ciyaartu u wareygsaa ciyaarihii kale ee sugayey. Marka ay ku soo noqoto ciyaarto, tiro horleh ayuu bilaabayaa ee halkii uu markii hore joogey kama qaadayo.

**Hurdan**: Waa ciyaar ay inta badan ciyaaraan kureyda iyo inta ka rooni. Lugaha ayaa laysla dhacaa. Gacmaha waxa la oggolyahay inaad qofka iskaga durkiso si aad u hesho baaxad aad lugta ku fidin karto. Qofkastaa wuxuu ku dadaalaa sidii aanay isaga wax ugu dheceen, balse uu isagu wax kuwa kale ugu dhufan lahaa. Waa ciyaar aad u xiiso badan, dhibteedana leh kolka si xeerka ka baxsan loo ciyaaro. Kolka la ciyaarayo waxa la yidhaa: *Hurdan jiijaa! Qoob dameerrada nin qalaadiyo Qaasin bay baray."*

**Laamootan** (ulatan): Carruurta da'doodu tahay 7-8 gu' ayaa laysugu dhiibaa dhengado yaryar, markaasay isla dhacaan. Meel kasta way iskaga dhufan karaan madaxa mooyaane. Runtii, waxan tan ku tilmaami karraa dagaal yar. Ilaa inta mid la eryanayana ciyaartu waa socotaa.


**Legdan** (wrestling):Waa ciyaar dhallintu ciyaarto. Laba siyood baana loo legdemaa. Mar labada geelaa la boobaa, marna waa laysaga xageeyaa. Marka labada geela la boobayo laysma gaado ee labada qof ee legdamayaa inta ay si wacan u kala buuxsadaan baa ninka laga xoog roonaado dhiniciisa dhulka la dhigaa. Marka laysaga xagaynayo, qofka itaalka is bidaya baa oggolaada inuu qofka uu la legdamayo gacan qudha ku qabsado. Haddii labada gacamood uga xageeyana waxay muujineysaa inuu qofka uu la legdamayo aad uga roonayahy dhanka da'da iyo itaalkaba.

**Luuf** (Quoits): Waxa kale oo ciyaartan loo yaqaan *hadaaf* Waa ciyaar ay carruurtu ciyaarto. Inta laba kooxood laysu qaybsho oo god yar meel laga qoto ayaa meel aan ka fogeyn godka laga soo tuuraa *bajayaal* ama kabo kolba waxa lagu heshiiyo in lagu ciyaaro. Qofka u horreeya ee bajihiisa tuuraa wuxuu ku dadaalayaa inuu bajihiisa godka ku rido ama u dhoweeyo. Qolada kale waxay ku dadaalaysaa iney uga dhowaato ama bajahooda ku dhufato bajahii qolada kale. Qolada ku guuleysata inuu bajyaashooda mid ka mid ihi godka galo ama u dhowaado ayaa guush leh. Qolada kale dameero ayey noqdeen baa la yidhaa, mid kasta oo kooxdaa ka mid ihina wuxu qaadaa kii dhiggiisa ahaa ee docda kale iyo labadoodii bajaba. Ka dameerka fuushan baa labadii bajaba 1oo dhiibaa markaasuu mid ahaan dhankuu doono u tuuraya. Intaanu bajihii kale tuurin ayuu ku yidhaahdaa: Maadi maani? Ujeeddada oo ah maadaa tuuri mise ani. Haddii uu ani yidhaa isagaa loo dhiibayaa, markaasuu ku dadaalayaa inuu bajahii hore loo tuurey uu ku dhufto kan dambe ee loo dhiibey. Haddii uu la waayo, sidii baa loo korsanaanayaa markaasuu intuu labadii bajaba soo qaado haddana u dhiibaayaa. Markale baa intii hore loo soo maray oodhan loo soo marayaa. Haddii uu la helana waa laga degayaa. Haddii uu yidhaase adiga, kii wax fuushanaa baa tuuraya oo isna ku dadaalaya inuu bajaha uu tuurayo la helo kii uu hore u tuuray. Haddii uu la waayo wuu ka degeyaa. Haddii uu la helase sidii buu u fuushanaanayaa ilaa inta ama uu isagu la waayo ama ka kale ku dhufanayo.

**Riddo**: Ciyaartan waxa ciyaara dhallinta gaashaan qaadka ah oo isu riddo dhigata. Waxa inta badan la rid-deeyaa warmaha iyo murjinnada. Meel ayaa laga wada ridaa iyada oo uu qofba mar riddeynayo ama uu tuurayo murjinkiisa ama warankiisa. Wax laga qiyaas qaataa halka uu marka u horraysa ku dhaco ee lama tirsado halka uu dulundulcada ku tago. Ciyaartaasi waxay waxtar weyn ka tarijirtey waagii warmaha lagu dagaalgelijirey, taasi oo ninba ninka uu ka riddo dheeryahay uu ka dagaal yahansanaa.

**Tuuryadhigasbo**: Ciyaartan dhallin iyo dhallaanba waa la ciyaaraa. Waxana lagu ogaadaa sida loo kala tuuryo dheeryahay. Halka riddada laga riddeeyo waran ama murjin, tuuryadhigashada dhagxaan baa la tuuraa. Qaabka dhagax la tuurayaa qayb buu ka qaataa tuuryada qudheeda. Sidaasi awgeed ayaa la xushaa dhaxaan tuuryo cuddoon oo aan aad u cuslayn aadna u fududayn.

**Shabadaan** (Hopscotch): Waxa kale oo ciyaartan loo yaqaan *Xayo* iyo *Hangaalli*. Waa ciyaar adduun weynaha oo dhan laga wada yaqaan inkasta oo habka loo ciyaaraa kala duwan yahay. Waxaanay gaar u tahay oo ciyaara carruurta. Sida hoos ku qeexan baana loo yaqaan qaybaheeda kala duwan.





Kolka shabadaanta la ciyaarayo waxa lagu ciyaaraa dhagax yar oo xalleefsan oo loo yaqaan baje. Qofka bilaabayaa wuxuu bajaha dhiganayaa kowkow (1). Inta uu ka dul boodo buu isku taagayaa labaaley(2) isaga oo hangalleysanaya. Saddexley buu iyana hangallo ku tegayaa. Suradaha hoose ayuu labada cagood dhiganayaa. Kadib Berbera ayuu u gudbayaa isaga oo lug keIiya isku taagaya. Suradaha sare ayuu ka soo laabmayaa. Intii buu haddana dib u soo marayaa. Kolka uu labaaley marayo waa inuu intuu foorarsado bajihiisii ka soo qaataa kowkow. Sidaasi ayuu u wadanayaa ilaa uu ka dhammeeyo ama ay ciyaartu ka wareegto. Waxay ciyaartu kaga wareegi kartaa haddii uu isaga oo doonaya inyuu bajahiisa dhigo Berbera uu ku dhaco saddexley ama dhaafo oo ku dhaco suradaha sare ama kuwa hoose mid ahaan.

Haddii uu ku guuleysto inuu dhammaystiro ciyaarta, kolka u dambeysa isaga oo bajihiisii sita ayuu ka soo bilaabayaa kowkow markaasuu suradaha sare debedda uga baxayaa. Inta uu sii jeesto ayuu baj ihii intuu madaxiisa soo dulmariyo dib u soo tuurayaa. Haddii bajahu ku dhaco 8daa meelood meel ka mid ah, meeshaasi isaga ayey u xidhnaanaysaa. Isku tallaab baanu ku astaysanayaa. Ciyaartiina wuu wareejinayaa. Haddii uu cidla' ku dhacase ciyaartii wuu wareejinayaa. Markale ayaanu u soo noqon inuu ku guuleysto inuu meel xidho iyo in kale. Marka qof meel xidho, qofka kale ee la ciyaarayaa, kuma joogsan karo ee wuu ka dul boodayaa. Tusaale ahaan, haddii Berberi qof u xidhantahay, kolka uu ka kale ku socdo suradaha sare wuu ka boodayaa. Sidaasi ayaa loo wadayaa ilaa labada qof ee wada ciyaarayaa mid ku guuleysto inuu meel kasta xidho ka kalena waayo meel uu cagtaba dhigo.

**Xeego** (Hockey): Waxa kale oo ciyaartan loo yaqaan *kabro.* Laba kooxood oo iska soo horjeedda ayaa ciyaarta. Waxa lagu ciyaaraa midhaha qoonka. Ulahana waxa laga soo goostaa geedka baarka ee laamihiisu u egyihiin kuwa timirta. Badanka waxa lagu ciyaaraa dhulka xeebta ah ee dhirtaasi ka baxdo.

**Durbaan**(Top): Waxa ciyaara dhallinta. Inta durbaanka xadhig dun ah oo la yidhaa *'khaytad'* lagu duubo ayaa dhulka lagu tuuraa. Durbaankuna markaasuu is wareejiyaa. Durbaanka si wacan u wareega waxa la yidhaa *'Caruusi'*. Ka boodbooda waxa la yidhaa *'Xodhxodhle'*. Mararka qaar bay dhallintu isugu faantaa kaygaa kaa wanaagsan oo kaa adag iyo kaygaa kaaga ka wanaagsan. Si loo muran baxo ayaa laysku dhuftaa. Haddii uu durbaankaagu noqdo mid jilicsan oo markii ka kale lala helaba dalooshama waxa la yidhaa waa *'Dhushmacaan'* .



Kolka mar lala helo ee in la fujiyana waxa la yidhaa *'Xashwad'* baa lagu jiidey. Intaan durbaanku inna soo gaadhin waxa lagu ciyaarijirey *cambuusha galoolka oo* kolkay engegto sidaa loo wareejin jirey. Iyada dun laguma duubijirin ee inta suulka iyo fardhexada caarada lagu qabto ayaa xoog loo wareejaa oo dhulka lagu tuuraa. Carruurta aan weli magaalada soo

gelini wey ku ciyaartaa. Dhulka oo qudha laguma tuuro ee marmarka qaarkood waxa loo dhigaa baabbacada oo ay cambuushu ku dul wareegtaa ilaa inta la joojinayo ama ay iskeed isu taageyso.

**Ciyaaraha yar iyo weynba fadhiga lagu ciyaaro waxa ka mid ah:**

**Bilabileysi:** Dhawr magac oo kale ayey ciyaartani leedahay. Waxa loo yaqaan *Kumbudhlo* ama *Kowkow*, dhallaanka ayaana ciyaara. Badiyaa habeenkii bey ku caweeyaan. Inta ay iswada barbar fadhiistaan oo ay cagaha dhiibsadaan buu ka u dhexeeyaa bilaabaa inuu tiriyo lugahooda isaga oo ka soo bilaabaya dhanka midig tirinayana heesahan soo socda mid ahaan:

a. Heesta koobaad:


*Kumbudhlooy, kumbudhlaalo caddooy, xabag geed ka baxdaay, bilo bilo, bilojira, koodaar, ka u dheer, ee dhexaad, ku jaroo, ku jiqsii, Biitooy laabo !*

b. Heesta labaad: *Guunguun, halalabi, laakhshaaw, bila bila, bila janno, Awbarraaw, tan maahee, teeda kale, ay ku timid, ay ku taa,l tallaabsoo, tarraq dheh!*

c. Heesta Saddexaad: *Biitooy biito, biito xariira, nayshay deylan, oo daba oogan, banbannaanis, bankay daaqo, bal aan soo eegee biitooy laabo!*

Ku kastaa kolka ay heestu lugtiisa ku dhammaato ayuu lugta laabanayaa. Kolka lugaha la wada laabto ayaa mid mid inta loo kambadhuudhsado oo labada suul ee gacamaa labada law la saaro kor loo kacaa. Qofkii ay lugihiisu 'qac yidhaadaan' waa faras baa la yidhaa. Ka ay sanqadhiwaayaanna waa dameer. Sidaasi ayey ku dhammaataa ama mar kale loogu ceshedaa oo intii in leeg loo soo maraa.

**Deleb**: Ciyaaraha ay dhallintu ciyaarto ayey tanna ka mid tahay. Waxa lagu ciyaaraa laba, saddex ama afar qof. Waxa la adeegsan jirey waagii hore afar qalbac (qori oo la kalajeexay). Qofka bilaabayaa afartaa qalbac ayuu inta labada sacab dhexdooda ku ruxo dhulka ku siiddaayaa. Kolka ay dhulka ku dhacaanna shantan siyood mid ahaan bay noqdaan oo loo guuraa:



***Deleb***

A. Saddexley*:* Waa kolka ay saddex caddaan noqdaan midna madow. Marka la rarayana waxa la yidhaa: *Tuux, taax, iyo waatan ama uguux, agaax iyo agaalli.*

B. Case: Waa marka ay afarta qalbacba caddaadaan, kolka la rarayana waxa la yidhaa: *Case, lame, sade, aar.*


*C. Site:* Waa kolka ay afartuba madow noqdaan. Waxa la guuraa siddeed god, waxana loo tirshaa sidan: *Site, seeri, armi, duubi. daalac. dugti, waxar, iyo waykan.*

D. Dug (Labaaley): Kolka ay laba caddaadaan labana madow noq-daan weeye. Waxana la yidhaa kolka la rarayo: *Luuleey, labaaley.*

*E. Deleb* (Yeeg): Waa kolka ay xabbadi caddaato.

*F.* Xabbada jirjirka isku taagta waxa la yidhaa *gaadh.* Maalin haddii la ciyaarayo waxa loo qaataa caddaan. Haddii habeen la ciyaarayase waxa loo tirsadaa madow ahaan.


**Shimbridhakh**: Ciyaartan waxa kale oo loo yaqaan shax yar. Sida shaxda ayaana loo degaa. Inta badanna carruurta ayaa ciyaarta ee dadka waayeelkii ma ciyaaro. Tiraba 6 qori (ama dhagax, saalo, iwm) oo saddexba cayn tahay baa lagu ciyaaraa. Sida shaxda ayuu qofkastaa ku dadaalaa inuu isku aaddiyo saddex qori ama dhagax oo uu leeyahay ka



**Shimbridhakh**

kalena wuxuu ku dadaalaa inaanay arrintaasi u suurtagelin ninka ka soo horjeeda. Haddii ay taasi suurtoobiweydo, marka la guurayo ayaa arrintaasi lagu dadaalaa. Qofkii ku hor guuleysta inuu saddex dhagax oo uu leeyahay isku aaddiyaa badiya.

**Tamaani**: Waxa ciyaara laba, saddex ama afar qof. Waxa lagu ciyaara afar bahal oo laga sameeyo bilaale ama sixni jabay oo dhinacna cad dhinaca kalana shagaar ku leh. Kolka ay dhinaca cad u wada dhacaan *cadcaddo* ama *warbac* ayaa la yidhaa. Afar god baana la guuraa. Kolka ay dhinaca madaw u wada dhacaanna *dig* baa la yidhaa.



Tamaani


Siddeed god baana laguuraa. Ciyaarta qofkii digta dhaliyaana wuu ku ceshadaa mar kale. Kolka ay saddex caddaan noqdaan midna madoobaado waxa la yidhaa *saddexley*. Waxana la guuraa saddex god. Kolka ay laba madooobaadaan labana caddaadaan waa labaaley. Waxana la guraa laba god. Kolka ay saddex madoobaadaan midna caddaado waa yeeg. Hal god baana la guuraa. Sida sawirka ka muuqataana loo guuraa iyada oo geeddiga laga bilaabayo *ammaanka* 'A' laguna xaroonayo *habarta* 'H'.

**Shax**: Waa ciyaarta ugu magaca weyn ciyaaraha aan maanta halkani kaga hadlayno. Yar iyo weynbana waa la jecelyahay. Waxay leedahay oo ku soo aroorta suugaan aad u tiro badan. Waxana si gaara u adeegsada abwaannada. Markiiba laba qof baa ciyaara. Mid kastaa wuxuu keensadaa laba iyo toban (12) dhagax oo isku midab ah ama isku jaad ah. Waxana loo jeexdaa sidan hoos ku sawiran.

Inta la ciyaarayo waa lagu xafiiltamaa, ama si dadban oo sarbeeb ah ayaa laysugu duurxulaa. Tusaale ahaan, waxa la sheegaa inuu Wiilwaal beri wiil uu adeer u ahaa uu dareen ka galay. Galab ayaa la wada shaxay. Wiilwaal oo arrintii gocanaya ayaa ku bilaabay oo yidhi:

*Wanaagsane walaalkay dhalyow*
*wiilkayow Maxamed*
*Sac wanaagsan oo weyl dhalay oo*
*meel wahdiya jooga*
*Oo yarahe waalwaalanoo*
*wiilasha eryooda*
*Inaanad weligaa horraadkiisa qaban*
ii *mar wacad Eebbe!*.

kanaan degey!


Shax

Wiilkii oo arrintii ku gartay baa u war celiyoo yidhi:

*Hal wanaagsan baad igu tidhee*
*midan ku weydiiyo*
*Hal waraabe dilay oo*
*weli xalaaleeyey*
*Waax guro haddii lagu yidhaa oon*
*waaxid kugu raacin*
*lnaanad weel madhan u soo qaadateen*
ii *mar wacd Eebbe!*
kanaan degey!

Goob kale waxa la soo weriyey iney Qamaan Bulxan iyo Cali-dhuux Aadan oo habro-wadaag ahaa arrintani dhex martay: Waxa la heshiisiiyey Qamaan iyo Cali-dhuux oo la yidhi ha isu gabyina kol haddii walaalo tihiin. Sidii baana lagu heshiiyey oo laysku gacan qaaday. Maalin dambe ayaa labadoodii oo duleedka reerka ku shaxaya Cali arkay baa la yidhi habaryartii oo haan biyo ah oo ay soo dhaamisay dhabarka ku sidda. Cali intuu heshiiskii iska iIloobey buu yidhi:

*Maxaa loo hoggaan baray duqdii*

*innugu hawshootay,*

Kanaan degey!

Qamaan intuu duurxuIkii hadaIka gartay buu markiiba u warceliyoo yidhi:

*Sidii naagtii gambada taabatee*
*gacanta loo maydhay*
*ee haddana meeshii xumayd gelisay*
*gabaygu sow maaha,*

kanaan degey!

Rag goobta fadhiyey oo ciyaarta labada abwaan daawanayey baa ku kala dhaartay baa la yidhi.

Mararka kale waa lagu kaftamaa


*Kanaan degay,*
*Kanaan door ka bidey,*
*kani danbaan moodey,*
*Ku kalaanse kula doonayaa,*
*Kanise ii duuban.*

*Shaxdaan degayba maad garan*
*wayna kaa shisheysaa*


Kolka la jeexo sida kor ku xusan laba qof baa ciyaara. Ninkastaa wuxuu soo fadhiistaa isaga oo wata laba iyo toban dhagax ama 12 xabbo oo saalo geel ah. Marka la degeyo qofba mar buu degaa. Qofkii shaxda jeexa baana hordega. Intaa wixii ka dambeeya ninka fooradda dhasha ayaa hor dega.

Kolka ay afar dhagax sidan soo socota isugu aadaan waxa la yidhaa:


*Afarrey*



Marka ay afar ama shan dhagax sidan soo socota isugu aadaanna waxa la yidhaa:




*Afarrey duuban*




Kolka shantii mid lixaad lagu daro oo ay sidan isugu aadaanna waa:

Afarrey kataan leh




Kolka saddex dhagax oo isku mid ihi isku aadaan waxa la yidhaa:




*Jare*

Marka sidan hoos ku qeexan loo degana waxa layidhaa:



*Laba jaraale*


Kolka ay sidan noqdaanna waxa weeye:




*Sudhan*

Kolkay sidan isugu aadaanna waa:

*Irmaan gudban*




Markay caynkan isugu beegmaanna waa :




*Irmaan dhereran*

Haddii ay caynkan isugu beegmaanna waxa la yidhaa iyana:

*Irmaan oodan*




Markay caynkan isugu beegmaanna waxa weeye:



*Irmaan oodan iyo afarrey*

Markay sidan isugu beegmaanna waxa la yidhaa iyana:

*Irmaan oodan iyo lixley*




Marka la degayo ciyaarta nin kastaa wuxuu ku dadaalaa inuu dego meelaha abballinka ah si uu hadhaw u soo bandhigo ciyaar tayo leh oo guul u keenta. Waxa kale uu mid kastaa ku dadaalaa inuu isku beego saddex dhagax oo uu leeyahay kaasi oo noqonaya 'Jare'. Marka la wada dego kii ku hor guuleysta inuu jare yeesho ayaa rarka yeesha. Waxaanu qaadaa dhagax ka mid ah dhagaxyada ninka la ciyaaraya. Kolka ay intaasu dhacdo, kii dhagaxa laga qaaday baa isana kolkiisa loo oggolyahay inuu qaado dhagx ka mid ah dhagxaanta kii dhagaxiisa qaaday. Intaa kolka lays dhaafsado, kii jaraha hor yeeshey baa geeddiga bilaaba oo guuraya.

Haddii ciyaarta qaybteeda hore lagu guuleysan waayo inuu midkood jare yeesho, waxa rarka yeelanaya kii jarahii hore lahaa mooyee kii kale. Intaa wixii ka dambeeya, mid kastaa wuxuu ku dadaalayaa inuu

jare dhaliyo. Jaruhu wuxuu daw u siiyaa ka dhaliya inuu qaado dhagax ka mid ah dhagxaanta ninka la ciyaaraya. Haddii ay dhacdo inuu ciyaartooy ku guuleysto inuu kan kale meel kasta ka soo oodo oo uu guurikariwaayo waxa la yidhaa "Oodan". Kii la soo wada xidhxidhayna wuxuu yidhaa: *jid isii aan jare ahayn.* Qasab ayey ku tahay inuu jid siiyaa, haddii kale ciyaarti wey istaagaysaa. Sidaasi ayey ciyaartu ku soconaysaa ilaa inta ragga ciyaaraya mid ka mid ihi ku guuleysanayo inuu wada qaado dhagaaxta ka ka soo horjeeda laba mooyaane. Sidii aan soo sheegney, kolka jare la sameeyo uun baa dhagax la qadi karaa, Jarana waxa sameeya saddex dhagax. Kolka laba soo hadhaan marna qofkaasi awood uma yeelan karo inuu jare sameeyo oo dhagax qaado. Markaa waa inuu is dhiibaa oo uu oggolaadaa in laga badshey.

**Gamsarogamsaro**: Ciyaartan carruurta ayaa ciyaarta. Waxaanay kobcisaa fiiradheeridooda. Guud ahaan waxay ku bartaan kuna ogaadaan qoys kasta oo deris ah ma xigaal ihi inta qof ee uu ka kooban yahay. Inteynaan haddaba sida loo ciyaaro u gelin aan wax ka tilmaamo ereyada lagu adeegsado kolka la ciyaarayo. Wiil kolka la tilmaamayo waxa lagu sheegaa *'qaalin'*. Gabadhana *'qaalin'*. Aabbaha iyo hooyadana waxa lagu tilmaamaa *'labada rugta iyo reerka iska leh'*. Hooyada aan oday lahayn waxa lagu tilmaamaa *'Baloolley'*. Ciyaarta labalaba ayaa loo ciyaara. Ilmaha bilaabaya ayaa yidhaa: Gamsaro, gamsaro. Ka kalana wuxuu ugu warcelinayaa: Gordin. Kii bilaabay baa odhanaya: Qaalin (Kolka uu tilmaamayo wiil), markaasuu kii kale odhanayaa: *ha duulo.* Ama waxa uu odhanayaa: Qaalin (Kolka uu gabadh tilmaamayo), markaasuu kii kalana odhanayaa: *ha wareegto!* Marka la marayo hooyada iyo aabbaha buu odhanayaa: *labadii rugta iyo reerkaba lahaa.* Haddii hooyo qudha la tilmaamayana waxa la odhanayaa: *Baloolley.* Wiilka ama gabadha la weydiinayaa waa inuu garto ama ay garato qoyska la tilmaamayo ee ka kooban inta la soo tirshey. Intii la doono ayey socotaa oo habeenkii oo dhan ba lagu caweeyaa. Waxa ay kobcisaa garashada iyo feejignaanta carruurta.


**Shantarad**: Ciyaartan waxa kale oo loo yaqaan *bub* iyo *yib*. Dhallinta iyo dadka waaweyniba wey ciyaaraan. Dhulka ayaana laga jeexdaa sida shaxda, shimbiri-dhakhda, iwm. Waxay leedahay 25 god oo la dego sida ka muuqata sawirka. Qofkasta oo ciyaarayaa wuxuu la yimaaddaa 12 dhagax oo ka duwan kuwa qofka kale ee la ciyaarayaa sito. Qofkastaa wuxuu dega labada hog ee uu doono, dhexda mooyaane. Marka 24ka hog la wada dego, qofkii u dambeeyey ee dega ayaa u hor guura.



**Shantarad**


Haddii laba dhagax oo uu leeyahay qofka guuraya uu dhagax kale oo uu leeyahay qofka la ciyaarayaa kala dhex galo wuu qaadayaa. Rarkana wuu wadayaa ilaa uu ka waayo wax uu qaado. Tusaale ahaan, haddii qofka dhagaxa madow lehi u raro godka madhan ee fallaadhu tilmaamaysaa wuxuu qaadayaa saddexda dhagax ee cadcad. Waayo mid kastaa wuxuu kala dhexgelayaa laba dhagax oo madmadow.

**Leelagoobaley**: Ciyaartan carruurta ayaa ciyaarta. Sida hoos ku qeexan waxa la qotaa toban god oo shaniba dhinac ka soo jeeddo. Gobollada qaar baa 12 god laga dhigaa. Laba qof oo qudha ayaa ciyaara. Mid kastaa wuxu keensanayaa 20 dhagax. Godkiibana waxa lagu ridayaa afar dhagax. Qofka bilaabayaa wuxuu ka bilaabayaa godkuu doono ee dhinaciisa xiga. Tusaale ahaan haddii uu B bilaabo wuxuu ka bilaabayaa godka u doceeya godadkiisa oo ah ka 5aad. Afartii dhagax waxa uu ku kala ridayaa godadka 6aad, 7aad, 8aad, iyo ka 9aad. Godka sagaalaad ayuu wixii ku jirey la wada baxayaa oo ku ridayaa godadka 10aad, 1 aad, 2aad, 3aad iyo ka 4aad. Haddana wuxuu qaadanayaa wixii godka afraad ku jirey oo uu u qaybinayaa ka 5aad, 6aad 7aad, 8aad iyo ka 9aad. Godka 9aad markii hore ayuu wixii ku jirey ka qaatay oo wuu madhan yahay. Kolkaasi halkaasi ayey ciyaartiisi ku ekaanaysaa. Waxana la yidhaa wuu *abaarsaday.*




Haddii uu tusaale ahaan uu ku ekaado godka 3aad sida ka muuqata sawirka wuxuu qaadanayaa wixii ku jira godka 8aad ee ka soo horjeeda godkaasi. Kolka ay god qudha dhagxaan badani ku ururto waxa la yidhaa cuur. Haddii uu geeddigiisu ku ekaado godka 4aad, godka ka soo horjeedana ( kan 7ad) ay ku jiraan 3 dhagax mid buu ka soo qaadanayaa si ay god walba ugu jiraan laba dhagax sida ku cad taswiirta kore ka muuqata. Labadaa god wuu


astaysanaa waxaanu odhanayaa: *Leelagoobalay geelu kugu yuus.* Wixii dhagax ah ee ku dhaca isaga ayaa iska leh. Qof kasta oo ciyaaraya oo dhagaxiisa u dambeeyaa ku ekaado labadaa god ciyaartu wey ka wareegeysaa.




**Leelagoobaley**

**Korubooto**: Dhulka ayaa tanna laga jeexdaa sida shantararadka, shaxda, iwm. Waxay leedahay 25 god oo la dego sida ka muuqata sawirka. Qofkasta oo ciyaarayaa wuxuu la yimaaddaa 12 dhagax oo ka duwan kuwa qofka kale ee la ciyaarayaa sito.

Intaan la bilaabin waxa dhagxaanta loo dhigaa sida ka muuqata sawirka.Haddii *'A'* dhagaxiisa hore u raro godka fallaadhu ujeeddo, 'B' halkii uu ka soo guuray buu u weydaaranayaa intuu ka korboodo. Dhagaxii uu *'A'* soo degeyna wuu qaadayaa. Sidaasi ayey ciyaartu ku soconaysaa ilaa mid la wada qaado.




**Korubooto**

**Shanley**: Waxa kale oo ciyaartan loo yaqaan *Kawtan*, waxana ciyaara carruurta. Inta badan waxa lagu ciyaara shan dhagax. Waxana loo ciyaaraa sidan soo socota:

Ilmaha ciyaarayaa shanta dhagax ayuu dhulka ku tuurayaa. Wuxuuna u tuurayaa si aanay hoosta isaga gelin ee uu midba meel ugu dhaco. Hal dhagax ayuu *cubbe* ahaan u qaadanayaa. Intuu kaa kor u tuuro ayuu intuu kor ku maqan yahay afartii hadhay mid ka mid ah soo qaadanayaa. Kolka uu soo qaato waa inuu kii korka ku maqnaa qabtaa intaanu dhulka ku dhicin. Sidaasi ayuu ku wadayaa ilaa uu ka dhammeeyo.Haddii uu qaban kariwaayo ciyaartu way ka wareegeysaa.

Kolkan shantii dhagax buu haddana u tuurayaa si ay afar dhagax labalaba isugu dhowaadaan midna uu baal ugu baxo. Ka goonnida noqda ayuu qaadanayaa. Intuu kor u tuuro ayuu laba dhagaxba mar soo-qaadayaa intuu kii hore kor ku maqanyahay.

Markan shanta dhagax wuxuu u tuurayaa si ay saddexna isugu dhowadaan labada kalena u kala durugsanaadaan. Intuu labada goonnida ah cubbe ka qaato buu afarta soo hadhay marka hore saddexda dhagax isku qaadayaa, marka kalena xabbad qaadanayaa.

Kolkan waa inuu u tuuraa si ay afar dhagax isugu dhowadaan midna goonni u ahaado. Xabbadda ayuu qaadayaa markaasuu kor u tuurayaa. Inta uu kor ku maqanyahay buu afartii dhagax isku kol soo qaadanayaa. Markaasuu kii kor ku maqnaana qabsanayaa. Intaasi kolkay dhammaato, shantii dhagax buu gacanta ku wada qabsanayaa markaasuu mid ka mid ah kor u tuurayaa. Inta uu kaasi kor ku maqanyahay ayuu farta murdisada laba jeer dhulka ku xarriiqayaa. Dhagaxi kolkuu soo noqdana wuu qabanayaa.

Intaasi kolka ay dhammaato ayuu murdisada iyo fardhexada gacanta bidix oo is dulsaar iyo suulka intuu qaab qaanso ka dhigo oo uu dhulka ku qotomiyo ayuu shantii dhagax dhulka ku dadinayaa. Mid buu qofkii la ciyaaray astaysanayaa. Intuu cubbe ka doorto inta kale oo uu kor u tuuro ayuu hal hal uga dusinayaa qaansada. Kii uu astaysay kii la ciyaarayey baa u dambaynaya. Haddii uu kala hormariyo ama uu ka dusinkariyo dhagxaanta qaar, ciyaartu way ka wareegeysaa. Wuxuuna sugayaa inta ay isaga u soo wareegeyso. Qofka ciyaarta hor dhammeeya uun baa reeya oo fooradda dhaliya.

Ugu dambayntii qoraalkan waxan ku eegay qaar ka mid ah ciyaaraha Soomaalida een ahayn kuwa jaanta iyo sacabka lagu kaaliyo. Kuwan oo aan ku tilmaamay kuwa jidhka iyo maanka lagu kobciyo. Intanna kuma dhamma, waxana lagama maarmaan ah horumarintooda iyo dib u soo noolayntooda intaba.